Casharka 28

1. Maxaa duurkii gubanayey ee Muuse arkay aan loo burburinin?
-Waayo Ilaah baa ku dhex jiray.

2. Yaa lagu masaalay duurkii gubanayey?
-Reer binu Israa'iil

3. Sidee baa duurka gubanaya loogu masaali karaa Israa'iil?
-Isla sida dabku ugu baxay geedka iyo dhirtiisa, ayaa reer binu Israa'iilna dab ugu dhex jiray, oo Shayddaanka iyo Fircoon ayaa doonayey inay burburiyaan reer binu Isra'aiil.
-Isla sida Ilaah ugu dhex jiray duurka gubanaya, ayaa Ilaahna ula jiray reer binu Israa'iil.

4. Muxuu ka macne yahay magaca Ilaah ee ah, "WAAN AHAY"?
-Wuxuu ka macne yahay inaanu Ilaah bilow lahayn.
-Wuxuu kaloo ka macne yahay in Ilaah aanu dhammaad lahayn.
-Wuxuu kaloo ka macne yahay in Ilaah weligii uu nool yahay.
-Waxaa kaloo magacaasu ka macne yahay inaanay jirin wakhti aanu Ilaah noolayn.

5. Miyaa Ilaah garanayaa in Fircoon is-hortaagi doono reer binu Israa'iil haddii ay damcaan inay dhulka ka baxaan?
-Haa, Ilaah wax waliba wuu garanayaa.

6. Maxay ahayd calaamaddii kowaad ee Ilaah ugu xaqiijiyey inuu Muue u doortay inuu reer binu Israa'iil ka wado dhulkii Msar?
-Waxay ahayd calaamaddii kowaad ushii Muuse oo iyadu isku rogtay Abeeso, dabadeedna isku rogtay ul gacanta muuse ku jirta.

7. Maxay ahayd calaamaddii labaad ee lagu muujiyey in Ilaah



doortay inuu Muuse hoggaamiyo reer binu Israa'iil oo uu ka saaro dalka Masar?
-Muuse gacantiisii baa caddaatay marka uu gacantiisa dhex geliyo jeebka koorkiisa, haddana gacantiisii caadi bay ku noqonaysay, haddii uu ku celiyo gacanta jeebkiisa.

8. Yuu Ilaah u soo diray in Muuse uu caawiyo si uu kul ahadlo Fircoon?
-Haaruun, oo ahaa Muuse walaalkiis.

9. Maxaa Ilaah u doonayaa inuu reer binu Israa'iil ka badbaadiyo addoonn-imada?
-Waayo Ilaah aad buu u jecel yahay, oo ma uusan doonaynin inay ku jiraan addoonnimo.
-Waayo Ilaah wuxuu Ibraahim ka ballanqaaday inuu ku hoggaamin doono dhulkii Kancaan.
-Waayo Ilaah wuxuu Ibraahim ka ballan qaaday inuu Badbaadiyaha ka soo dhex bixin doono Israa'iil.

-Ilaah wuu dhowray ballankii uu la dhigtay Muuse, oo wuxuuu soo diray walaalkiis Haaruun si Muuse loo caawiyo.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 4:27-28

27-Markaasaa Rabbigu wuxuu Haaruun ku yidhi, Tag inaad Muuse kaga hor tagtid cidlada dhexdeeda. Markaasuu tegey, oo wuxuu kaga hor tegey buurta Ilaah, Kolkaasuu dhunkada.
28-Kolkaasaa Muuse wuxuu Haaruun u sheegay erayadii Rabbigu u soo faray oodhan, iyo calaamooyinkii uu ku amray oo dhan.

-Muuse iyo Haaruun waxay u soo kicitimeen dhulkii Masr.

-Markii Muuse iyo Haaruun ay Masar soo gaareen, waxay isugu yeereen reer binu Israa'iil oodhan, oo waxaa loo sheegay wixii Ilaah soo faray Muuse.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 4:29-31

29-Markaasaa Muuse iyo Haaruun tegeen oo waxay isu soo ururiyeen waayeelladii reer binu Israa'iil oodhan.
30-Markaasaa Haaruun kula hadlay erayadii Rabbigu muuse u soo faray oo dhan, calaamooyinkiina dadka hortiisuu ku sameeyey.
31-Dadkiina way rumaysteen, oo markay maqleen inuu Rabbigu soo booqday reer binu Israa'iil iyo inuu arkay dhibaatadooda ayay madaxa hoos u foororiyeen oo caabudeen.

-Miyaa reer binu Israa'iil aqbaleen Hadalladii Ilaah kula hadlay Muuse?

-Haa.

-Maxay haddaba ah ahmiyad ballaarnayd in reer binu Israa'iil ay Ilaah hadalladiisa rumaystaan?

-Waayo Ilaah oo keliya ayaa awood u lahaa inuu badbaadiyo Israa'iil.

-Waayo Hadallada Ilaah oo keliya ayaa awood u lahaa inay badbaadiyaan Israa'il.

-Haddii aynaan Ilaah rumaysanin, maxaynu Ilaah ugu yeeraynaa?
-Beenaale.



-Miyaa Ilaah badbaadiyaa kuwa aan hadalladiisa rumaysan?
-Maya.

-Haddii aynaan rumaysan Hadallada Ilaah, dabadeeto layna badbaadin maayo.

-Ilaah wuxuu kaa doonayaa inaad maqasho Hadalladiisa si aad ku badbaaddo.

-Ilaah oo keliya ayaa badbaadin kara dadkiisa.

-Hadallada Ilaah oo keliya ayaa dadka bdbaadin kara.

-Kaddib markii Muuse iyo Haaruun ay dhammeeyeen hadalkii ay u soo jeedinayeen reer binu Israa'iil, ayey u keceen Fircoon.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 5:1-2

1-Oo dabadeedna Muuse iyo Haaruun waxay u tageen Fircoon, oo waxay ku yidhaahdeen, Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay: Sii daa dadkaygu ha tageene, inay cidlada iigu ciidaan.
2-Markaasaa Fircoon wuxuu yidhi, Waa ayao Rabbiga ay waajibka igu tahay inaan codkiisa maqlo oo aan reer binu Israa'iil sii daayo? Anigu garan maayo Rabbiga, oo weliba sii dayn maayo reer binu Israa'iil inay tagaan.

-Muxuu Fircoon yiri markii Muuse u sheegay isaga inuu Rabbiga ku amray in reer binu Israa'iil ay tagaan?

-Fircoon wuxuu yiri, "Garan maayo Rabbiga, oo weliba sii dayn maayo reer binu Israa'iil inay tagaan."

-Maxaa keenay in Fircoon aanu aqoonsan Ilaah?

-Waayo Fircoon ma uusan doonaynin inuu Ilaah wax ka ogaado

-Waayo Fircoon ma uusan doonaynin inuu Ilaah rumaysto.
-Waayo Fircoon wuxuu jeclaa dembiyadiisa.

-Fircoon iyo dadkii reer Masar ma ayan rumaysnayn Ilaah.

-Fircoon iyo dadkii reer Masar waxay caabudi jireen webiga weyn ee Niin oo dhulkooda ku yaal.

-Fircoon iyo dadkii reer Msar waxay caabudi jireen qorraxda, dayaxa, xiddigaha iyo weliba xayawaanka.

-Dadkii reer Masr waxay kaloo caabudi jireen Fircoon oo iyaga u ahaa sida ilaah.

-Fircoon iyo dadkii reer Masar waxay caabudi jireen wixii Ilaah abuuray, intii ay caabudi lahaayeen Ilaahii abuuray waxyaalahaas.

-Wakhtigii Fircoon, dad badan ayaa waxay diideen inay rumaystaan xaqiiqooyinka Ilaah.

-Maanta, xitaa, dad badan ayaa wasxay diideen inay rumaystaan xaqiiqooyinka Ilaah.

-Ilaahna wuxuu u daayey iyaga khiyaanada Shayddaanka.

-Shayddaanka wuxuu khiyaaneeyey dadka, dadkuna waxay caabudeen wax waliba ee kale Ilaah mooyaane.



-Maaddaama dad badan oo dunida ku nool ay diideen xaqaa'iqa ama runta Ilaah, ayaa Ilaah doortay Ibraahim si uu ku noqdo Aabbaha reer binu Israa’iil.

-Ilaah wuxuu doortay inuu Badbaadi-yaha soo diro isagoo soomarsiinaya Ibraahim iyo Israa’iil.

-Ilaah wuxuu kaloo doortay inuu xaqiiqooyinkaas ku qoro kitaabkiisa, kaasoo soo dhex mari doona Ibraahim iyo Israa’iil.

-Kitaabka Ilaah waxaa loo yaqaannaa Baybalka.

-Miyaa Ilaah garanayaa in Fircoon aanu oggolaanaynin in reer binu Isra'aiil Masar ka tagaan?

-Haa.

-Ilaah wuxuu garanayaa wax waliba ka hor intaanay dhicin.

-Markii Fircoon diiday in reer binu Isra'aiil ka tagaand hulkiisa, bal dhegayso wixii Muuse ku yiri:

Bal aynu akhrinno Baxniintii 6:1

1-Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Hadedaba waad arki doontaa waxaan ku samayn doono Fircoon, waayo, gacan xoog leh buu ku sii dayn doonaa iyaga, oo gacan xoog leh buu dhulkiisa kaga eryi doonaa.

-Maxaa Ilaah u go'aansaday inuu xooggiisa tuso Fircoon iyo reer Masar?

-Si ay ku ogaadaan in Ilaaha baaqiga ah oo keliya uu yahay kan dhabta ah.

-Ilaah wuxuu goostay in Fircoon iyo Masarba la tuso, in webiga weyn ee ay leeyihiin uusan ahayn Ilaah.

-Ilaah wuxuu kaloo go'aansaday inuu Fircoon iyo reer Masarba tuso in qorraxda, dayaxa, iyo xiddegaha aanay Ilaah ahayn.

-Ilaah wuxuu kaloo go'aan ku gaaray inuu Fircoon iyo reer Masarba tuso in xayawaanka ay caabudayaan aanay ahayn Ilaah.

-Waxaa kaloo Ilaah go'aansaday inuu Masaarida u muujiyo in Fircoon uusana ahayn Ilaahooda.

Bal aynu akhrinno kitaabka Baxniintii 6:2-8

2-Markaasaa Ilaah wuxuu la hadlay Muuse oo ku yidhi, Anigu waxaan ahay Rabbiga.

3-Oo waxaan ugu muuqday Ibraahim, iyo Iwsxaaq, iyo Yacquub, sidii Ilaaha Qaadirka ah, laakiinse magacayga ah Rabbi iguma ay aqoonin.

4-Oo weliba axdigaygii waan la dhigtay iyaga inaan siiyo dalka reer Kancaan oo ah dalkii geeddinimadooda oo ay qariibka ku ahaayeen.

5-Oo weliba waxaan maqlay cabaadka reer binu Israa'iil oo Masriyiintu addoonsiga ku sii hayaan, oo axdigaygii baan xusuustay.

6-Haddaba waxaad reer binu Israa'iil ku tidhaahdaa, Anigu waxaan ahay Rabbiga, oo waan idinka soo bixin doonaa culaabta Masriyiintu idinku hoos hayaan. Waanan idinka xorayn doonaa addoonisgooda, waanan idinku furan doonaa gacan fidsan iyo



xukummo waaweyn.

7-Oo waxaan idiin qaadan doonaa dad ahaan, oo aan idiin noqon doonaa Ilaah, oo waxaad ogaan doontaan inaan anigu ahay Rabbiga Ilaahiinna ah oo idinka bixinaya culaabtii Masriyiinta.

8-Oo waxaan idin geeyn doonaa dalkii aan ku dhaartay inaan siiyo Ibraahim, iyo Isxaaq, iyo Yacquub, oo idinkaan dhaxal ahaan idiin siin doonaa. Anigu waxaan ahay Rabbiga.

-Ilaah wuxuu go'aansaday inuu awooddiisa u muujiyo reer binu Israa'iil si ay ku gartaan inuu ahaa Ilaahii Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub.

-Ilaah wuxuu goostay inuu awooddiisa u muujiyo reer bin Israa'iil si ay ku ogaadaan inuu yahay Ilaahooda, iyo Ilaaha reer Israa'iil ama Yacquub.

-Maaddaama Fircoon diiday inuu sii daayo reer binu Israa'iil, Ilaah wuxuu go'aansaday inuu awooddiisa weyn muujiyo.

-Sidee buu Ilaah awooddiisa weyn ugu muujiyey reer Masar iyo reer binu Israa'iil?

-Ilaah wuxuu soo diray belaayooyin lagu soo daayin Fircoon iyo Masriyiinta.

-Markaa belaayada kowaad, wuxuu Ilaah ka dhigay webigii dhulka Masar dhiig.

-Ha yeeshee dhanka ay reer binu Israa'iil deggan yihiin webigu dhiig kama noqon.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 7:20-21

20-Markaasaa Muuse iyo Haaruun yeeleen sidii Rabbigu ku amray; kolkaasuu ushii kor u qaaday, oobiyihii webiga ku jiray ku dhuftay. Fircoon iyo addoommadiisii hortooda, markaasaa biyihii webiga ku jiray oo dhammu waxay u rogmadeen dhiig.
21-Kalluunkii webiga ku jirayan way wada bakhtiyeen; webigiina waa uray, Masriyiintiina biyo way ka cabbi kari waayeen webigii; dhulkii Masar ood hammuna wuxuu noqday dhiig miidhan.

-Fircoon wuxuu baryey Muuse inuu belaayada qaado, wuxuuna ku yiri waan sii daynayaa reer binu Israa'iil.

-Laakiin markii belaayadii tagtay, Fircoon wuxuu diiday in reer binu Israa'iil tagaan.

-Belaayadii labaad, ayaa Ilaah wuxuu soo diray rah badan oodhulkii saaqay.

-Dhulkii Fircoon iyo Masaarida waxaa qariyey ama hareeyey rah fara badan.

-Belaayada, haddaba, sooma gaarin halkii reer binu Israa'iil ay degganaayeen.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 8:5-6

5-Markaasaa Rabbigu wuxuu Muue ku yidhi, Waxaad Haaruun ku tidhaahdaa, Gacanta adoo ushaada ku haysta ku fidi webiyaasha dushooda, iyo durdurrada dushooda, iyo balliyada dushooda, oo rahyo ku soo daa dalka Masar.
6-Markaasaa Haaaruun gacanta ku kor fidiyey biyihii dalka



Masar oodhan, kolkaasaa rahyadii soo bexeen oo qariyeen dalkii Masara.

-Fircoon mar kale ayuu Muuse ka baryey inuu belaayada dhulka ka qaado, oo wuxuu yiri haddana dadka waan sii daynayaa.

-Laakiin markii Ilaah belaayadii qaaday, Firoon haddana wuu diiday inuu dadka sii daayo.

-Markii saddexaad, Ilaah wuxuu soo diray belaayadii injirta.

-Fircoon, iyo Masriyiinta iyo dhulak oodhan, waxaa qariyey injir.

-Belaayada, haddaba, ma aanay soo gaarin halka ay reer binu Israa'iil ku noolaayeen.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 8:16-17

16-Markaasaa Rabbigu wuxuuMuuse ku yidhi, Waxaad Haaruun ku tidhaahdaa, Ushaada fidi oo ciidda dhulka ku dhufo si uu dalka Masar oo dhammu injir miidhan u noqdo.
17-Markaasay sidii yeeleen, Kolkaasaa Haaruun ushiisii gacanta ku fidiyey, oo wuxuu ku dhuftay ciidda dhulka, kolkaasaa injiru gashay dadkii yo duunyadiiba; ciidddii dhulka oo dhammuna waxay noqotay injir miidhan oo qulqulaysa dalkii Masar oo dhan.

-Fircoon Muuse ayuu baryey haddana si bal belaayadan looga qaado dhulka, oo wuxuu ku yiri, waan sii daynayaa dadka.

-Laakiin markii belaayadiid hammaatay, Fircoon haddana wuu diiday inuu dadka Israa'iil sii daayo.

-Belaayadii afraad, ayaa Ilaah soo diray duqsiyo.

-Dhurlkuu Masar iyo Fircoonba waxaa daboolay duqsi.

-Belaayada haddaba ma aanay soo gaarin dhulkii ay reer binu Israa'iil ku noolaayeen.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 8:24

24-Rabbiguna sidii buu yeelay, oo duqsiyo badan oo baas ayaa yimid gurigii Fircoon, iyo guryihii addoommadiisa, oo dalkii Masar oo dhanna duqsiyadii badnaa aawadood ayuu kharribmay.

-Fircoon Muuse ayuu baryey haddana in belaayadan ay dhaafto, wuxuuna shegay inuu dadka Isra'aiil sii daynayo.

-Laakiin  markii Ilaah belaayadii qaaday, Fircoon wuu diiday inuu dadka sii daayo.

-Belaayadii shanaad, Ilaah wuxuu soo diray dhimashada xayawaanka ood han.

-Waxaa dhintay haddaba xoolihii reer Masar ahadday ahaan lahaayeen fardo, lo' ido, geel iyo weliba dameero.

-Belaayada, haddaba, ma aanay soo gelin halkii ay reer binu Israa'iil ku noolaayeen.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 9:6-7

6-Rabbiga waxaa waa sameeyey malaintii dambe, oo xoolihii Masar oo dhammuna way wada bakhtiyeen; laakiins



coolihii reer binu Israa'iil midna kama bakhtiyin.

7-Markaasaa Fircoon cid diray, oo bal eeg, xoolihii reer binu Israa'iil xataa mid kama bakhtiyih. Laakiinse Fircoon wuu madax adkaaday, dadkiina siima uu dayn inay tagaan.

-Fircoon wuxuu aad u baryey Muuse inuu ka qaado belaayada, oo wuxuu ku yiri reer binu Israa'iil waan sii daynayaa.

-Balse markii belaayadu tagtay Fircoon wuu diiday in dadku tagaan.

-Fircoon iyo reer Masar waxaa lagu soo salladay boogo ama ka-soo bax.

-Belaayada, haddaba, ma aanay soo gelin dhulka halka reer binu Israa'iil ay ku noolaayeen.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 9:10

10-Markaasay Qaadeen dambaskii foornada, oo waxay hor istaageen Fircoon, kolkaasaa Muuse xagga Samada kor ugu saydhay, makraasaa dadkii iyo duunyadiiba waxaa ka soo wada baxay boogo xunxun.

-Fircoon mar kale ayuu Muuse baryey inuu belaayada ka qaado, oo wuxuu yiri reer binu Iraa'iil waan sii daynayaa.

-Balse markii belaayada laga qaado, Fircoon wuu diidi jiray inuu sii daayo reer binu Israa'iil.

-Belaayadii toddobaad, Ilaah wuxuu soo diray roob-dhagaxyaale.

-Roobku wuxuu ku da'ay dhulkii Masr, wuxuuna burburiyey geedihii iyo mirihii firciin iyo Masaarida.

-Ha yeeshee belaayada ma aanay soo gaarin goobta ay reer binu Israa'iil ku noolaayeen.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 9:23-26

23-Markaasaa Muuse ushiisii u fidiyey xagga samada, oo Rabbigu wuxuus oo diray onkod iyo roobdhaxyaale, waxaana dhulka ku soo degay dab; oo Rabbigu wuxuu dhulkii Masar ku soo daayay roobdhagaxyaale.

24-Sidaas daraaddeed waxaa ku soo da'ay, roob-dhagaxyaale baas, roobka dhagaxyaada lehna waxaa ku qaldanaadab, kaas oo kalena weligii kama di'in dalka Masar oodhan tan iyo maalintii ay quruun noqotay ilaa haatan.

25-Oo roobkii dhagaxyada lahaana wuxuu laayay wax alla wixii dalka Masar ood han duurkiisa joogay, dad iyo duunyoba; oo dhalatadiiduurka oodhanna roobkii dhagaxyada lahaa baa laayay, oo dhirtii duurka oodhanna wuu jejebiyey.

26-Waxaa keliyahoo aan roobdhaxayaale ku di'in dalkii Goshen oo reer binu Israa'iil joogeen.

-Fircoon Muue ayuu baryey inuu haddana qaado belaayada, oo wuxuu ku celiyey baaqiisii ahaa inuu dadka sii dayn doono.

-Laakiin markii Ilaah qaaday belaayadii, Fircoon wuu diiday inuu dadka sii daayo.

-Belaayadii siddeedaad, Ilaah wuxuu soo diray anyax.

-Anyixii wuxuu cunay caleemihii geedaha ku haray iyo mirihii



Fircoon iyo Masriyiinta.

-Belaayadan, haddaba, sooma gaarin deegaankii ay reer binu Israa'iil ku noolaayeen.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 10:13-15

13-Markaasuu Muuse ushiisii dalkii Masar ku kor fidiyey, oo Rabbig maalintaas oodhan iyo habeenkii oodhan, wuxuud hulka ku soo daayay dabayl bari ka timid, oo markii waagii beryay ayaa dabayshii bari ayaxii keentay.

14-Kolkaasaa ayaxii dalkii Masar oo idil dul fuulay, oo wuxuu ku sood egay dalkii Masar oodhan; wuxuuna ahaa ayax baas; hortiisna lama arag ayax saas oo kale ah, dabadiisna ma jiri doono kaas oo kale.

15-Waayo, wuxuu qariyey dhulkii dushiisa oodhan, kolkasaa dalkii gudcur noqday; oo wuxuu cunay dhalatadii waddanka oodhan, yo midhihii dhirtii roobkii dhagaxyada lahaa ka baxsaday oodhan; oo dalkii Masar oodhanna wax cagaar ahuna kuma hadhin ama dhir ha noqoto ama dhalatada duurka.

-Fircoon Muuse ayuu haddana beryay inuu belaayada ka qaado dhulka, oo wuxuu ku yiri, reer binu Israa'iil imminka waan sii dayn doonaa.

-Laakiin mrkii Ilaah qaaday belaayada, Fircoon wuxuu diiday inuu reer binu Iraa'iil sii daayo.

-Maraana Ilaah wuxuu soo diray belaayadii sagaalaad, oo waxay belaayadaasu ahayd gudcur dam ah.

-Gudcurku wuxuu daboolay dhulkii Reer Masar oo fircoon ka

talinayey ilaa iyo saddex maalmood.

-Belaayada, haddaba, sooma gelin dhulka , halkaasoo reer binu Israa'il ay ku noolaayeen.

Bal aynu akhrinno Baxniitii 10:21-23

21-Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Gacantaada xagga samada u taag, iyo gudcur u soo dego dalka Masar, kaasoo ah gudcur aad u daran.
22-Kolkaasaa Muuse gacanta xagga samada u taagay; oo waxaa dalkii Masar ku soo degay gudcur weyn oo in saddex maalmood ah jiray'
23-Oo midkoodna midka kale ma arkin, ama midkoodna meeshiisii kama kicin in saddex maalmood ah; laakiinse reer binu Israa'iil oodhan guryahoodu iftiin bay lahaayeen.

-Fircoon wuxuu baryay Muuse inuu ka qaado belaayada dhulka, oo wuxuu haddaba sheegay in uu sii daynayo reer binu Israa'iil

-Laakiin markii Ilaah belaayadii qaaday, ayuu haddana Fircoon diiday inuu Israa'iil faraha ka qaado.

-Maxaa haddaba belaayadu ugu dhici waysay halkii reer binu Israa'iil degganaayeen.

-Waayo Ilaah baa Ibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub ka ballanqaaday inuu barakadayn doono, iyo inuu ka dhigi doono dad qiimi leh.

-Waayo Ilaah wuxuu Fircoon iyo reer Masar iyo Israa'iilba tusay in isaga kelidiis uu Ilaah yahay, oo uusan mid kale jirin.



-Weliba kaddib belaayooyinkaas naxdinta leh, ayaa Fircoon weli diiddan yahay in dadka Israa'iil ay tagaan.

-Weliba belaayooyinkaas markii lagu salladay, Fircoon wuxuu diiday inuu Ilaah addeeco.

-Miyaa Fircoon la dagaallami karaa Ilaah oo guulaysan karaa?
-Maya.

-Miyaa cidi Ilaah la dagaallami kartaa oo guulaysan kartaa?
-Maya.

-Maxaa ku dhici doona kuwa Ilaah la dagaallama?
-Ilaah baa burburin doona.

-Casharka kan inoogu xiga ayaannu belaayada ugu dambaysa ku baran doonaa.